



Talooyinka Is-diyaarinta ee Dhegoolaha iyo Kuwa Dhego Culus

Qalabka Gargaarka Maqalka

- Qalabka gargaarka maqalka dhigo meel aad si fudud uga heli kartid ka dib masiibo. Tusaale ah aan, waxa aad dhigan kartaa weel yaala sariirtaada agteeda waxana aad weelka ku xidhi kartaa miis yar oo ag yaala sariirta ama rukunka sariirta adiga oo isticmaalaya xadhig ama Velcro. Qalabka gargaarka maqalka ee la waayo ama dhaawacma way adkaan doontaa in la beddeelo ama la hagaajiyoo isla markiiba ka dib masiibo weyn.

Baytariyo

- Kaydso baytariyo dheeraad ah oo loogu talogalay qalabka gargaarka maqalka iyo qalabka dhegta ku rakiban. Haddii ay suurtogal tahay, qalab gargaar maqal oo dheeraad ah ku dar kaydkaaga xaaladaha degdegga ah.
- Ha kuu dabeysnaadeen “pager”-kaaga, telefonka hadalka qora (captioned telephone) iyo qalabka kale ee isgaadhsiinta.
- Ilaali baytariyada oo kuwo dheeraad ah u kaydso qalabkaaga TTY iyo qalabka kale ee isgaadhsiinta. Buugga mulkiilaha ka fiiri ilaalinta haboon ee baytariga.

Isgaadhsiinta

- Waa inaad taqaanid sida xidhiidh loola yeesho shaqaalaha xaaladaha degdegga haddii aanuu jirin turjubaan ama haddii aanad haysan qalabkaaga gargaarka maqalka. Tan daraadeed u kaydso waraaqo iyo qallimo.
- Ku fikir inaad qaadato ama sidatid koobi sii daabacan oo ah fariimaha muhiimka ah, sida:
 - “Waxa aan isticmaalaa Luqadda Calaamadaha ee Maraykanka waxana aan u baahanahay turjubaan ASL.”
 - “Ma qoro mana akhriyo Ingiriisiga.”
 - “Haddii aad bixisid ogeysiin, waxana aan u baahan doonaa in la qoro ama la raaciyo calaamadaha dhegoolaha.”
- Haddii ay suurtogal tahay, soo qaado telefishanka baytari ku shaqeeya oo leh “decoder chip” si aad u heshid warbixinnda xaaladaha degdegga ah ee la raaciyyay calaamadaha dhegoolaha ama hoosta qoraal laga raaciyyay.
- Garo warbaahinta si joogto ah u bixiya war hoosta qoraal looga sameeyay iyo/ama war la raaciyyay calaamadaha dhegoolaha.

Digniinta

- Rakibo qalabka digniinta qiiqa oo bixinaya digniin la arki karo oo la maqli karo. Waa in ugu yaraan hal mid oo ah qalabka digniinta qiiqa uu ku shaqeeyo baytari.

U-doodis

- Turjubaano ku qalqaali inay tabaruceyaal ka noqdaan Laanqayrt Cas.
- Telefishanada ku dhiirigali inay dhammaan warka iyo maclumaadka xaaladaha degdegga ku soo tabiyaan qaab ah qoraal hoosta ah oo furan.
- Ku dhiirigali telefishanada inay ku talogalaan inay bixiyaan turjubaano kamarada ka hawlgala inta lagu jiro xaalado degdeg ah.
- Marka aad safartid, u hubso in hoteeladu leeyihii adeegyo loogu talogalay dhegoolaha iyo dhego-cuslahu, oo ay ku jiran digniin la arki karo. Weydiiso adeegyadaas marka aad qaabiliaadda hoteelka iska diiwaangalinaysid.



PO Box 47890
Olympia, WA 98504-
7890

Bogga Internetka:
www.doh.wa.gov

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-005
Somali